IRAP
International Refugee
Assistance Project

Sideen u qoraa codsiga dib u eegista kiiskeyga dib udejinta qaxootinimo ee uu mareykanku soo diidey?

Dulmar

Hagahan/tusahan waxaa loogu talagaley qaxootiga:

1. Ku sugan dibadda mareykanka;
2. Kuwaasoo marey wareysiga dib udejinta mareykanka ee ay qaado hay'ada mareykanka u qaabilsan jinsiyadaha iyo socdaalka ee marka magaceeda laso gaabiyo loo yaqaano USCIS ("wareysiga dhaarta");
3. Kuwaasoo loo diidey dib udejinta mareykanka kadib markii wareysigaas ay ka qaadey USCIS ("wareysiga dhaarta");
4. Kuwaasoo raba iney gudbistaan 'Dalab dib u eegis' (RFR) si ay racfaan uga qaataan go'aankaas.

Hagahan/tusahan looguma talagalin qaxootiga:

1. Ay soo diidey hay'ada UNHCR; **ama**
2. Dib udejin loogasoo diidey wadamo kale oo aan mareykanka ahayn; **ama**
3. Kusugan gudaha mareykanka.

TALAABADA KOOWAAD Dib uga fikir khibraddii wareysigaad horey usoo martey

TALAABADA LABAAD Dib u eeg warqadaadi diidmada

TALAABADA SEDAXAAD Kiiskaaga diyaarso

TALAABADA AFARAAD Soo diyaarso wixii dokumenits ah ee kiiskaaga xoojin kara

TALAABADA SHANNAAD Qor codsiga dib u eegista

TALAABADA LIXAAD Gudbi codsiga dib u eegista

Maxaa xigi doona?

IRAP
International Refugee
Assistance Project

Guud ahaan, keliya hal dalab oo dib u eegis ayaa la aqbali doonaa, Sidaa daraadeed waa inaad u qortaa dalabkaaga dib u eegista si taxadir leh. Waa inaad soo gudbisaa dalabkaaga dib u eegista mudo 90 maalmood gudohood ah laga bilaabo marka ay kusoo gaartey warqadda diidmada.Hataa hadii aad ku gudbin waydo waqtigaas laguu qabtey gudihiis weli waxaad gudbin kartaa dalab dib u eegis adigoo sharxaaya sababta dib udhaca dalabkaaga, USCIS waxay go'aan ku qaadan kartaa iney diido dalabka dib u eegista iyagoo usababayn kara inaan lagusoo gudbin mudadii 90ka maalmood ahayd ee loogu talagaley in lagusoo gudbiyo.

TALAABADA KOOWAAD: Dib uga fikir khibraddii wareysigaad horey usoo martey

Waxa ugu horeeya ee aad sameyneysid waa inaad is weydiisaa su'aalahan soo socda si aad u fahanto waxa ay noqon karto sababta laguusoo diidey. Tan waxay kugu caawineysaa inaad go'aan kagaarto waxay ay tahay inaad diirada kusaarto warqadaada codsiga dib u eegista.

- Muxuu ahaa mawduuca uu diirada saarey qofka wareysiga kaa qaadey?
- Qofka wareysiga kaa qaadey qayb gaar ah oo sheekadaada kamid ah miyuu diirada saarey?
- Qofka wareysiga kaa qaadey su'aal isku mid ah miyuu marar badan kuweydiiyey?
- Qofka wareysiga kaa qaadey mawduuc ama arin gaar ah oo kiiskaaga kusaabsan oo uu ahmiyad siiyey miyaa jirtey?
- Mafahantey macluumaadka uu kaa rabey sarkaalka kuwareysanaayey?
- Wax isfahanwaa ah majireen inta uu socdey wareysiga?
- Qofka kuwareysanaayey miyuu fahmaayey waxa aad kuhadleysey?
- Turjumaan ma joogey?
- Turjumaanka maku qanacsaneyd oo si fiican ma isu fahmeyseen?
- Majiraan wax dhibaato ah oo aad kala kulantey turjumaanka ama qaabka turjumaada?
- Wareysiga inta uu socdey majirtey mar lajoojiyey? Hadey sidaa tahay, maxaa dhacay waxyer kahor intaan wareysiga lajoojin?
- Qofka wareysiga kaa qaadayey si kumeel gaar ah miyuu qolka uga baxay? Hadey sidaa tahay, maxaa dhacay waxyer kahor inta uusan qolka katagin?
- Wareysiga waqti intee la'eg buu qaatey? Makuula muuqdey mid aad u dheeer ama aad u gaaban?
- Ma umaleynaysaa inaad sheegtey sheekadaada oo dhan? Qofka kuwareysanaayey miyuu kaa joojiyey inaad sheegto sheekadaada oo dhameystiran? Maxay yihiin waxyaabaha sheekadaada kamid ah ee aadan u sheegin qofka kuwareystey?
- Majirtey mar uu isbedeley jowiga qofka ku wareysanaayey inta uu wareysiga socdey? Hadey sidaa tahay, maxaa dhacay waxyer kahor inta jowigiisa uu isbedelin?
- Maxaad umaleynaysaa iney qaldameen?

IRAP
International Refugee
Assistance Project

TALAABADA LABAAD: Dib u eeg warqadaadi diidmada

Warqad diidmo waxaa ladhahaa ogeysiis qofka la ogeysiinaayo inuusan uqalmin ama xaq ulahayn. wuxuu kuu sheegaya sababta laguusoo diidey. Xaruunta ama hay'ada qaabilsan fududeynta dib udejinta ee kutaala meesha aad joogto sida (IOM, ICMC, CWS, IRC, HIAS) ayaa shakhsiyan kusiin doonta warqadda diidmada ama boosto haguugu soo dirto ama email. Haddii aadan helin warqadda diidmada ama ay kaa luntey waa inaad laxiriirtaa xaruunta hay'ada dib udejinta fududeysa ee kutaala deegaankaaga. waxaa jira todobo sanduuq/box oo ay suuragal tahay in saxiix/calaamad laga saaro warqadaada diidmada. Raadi sanduuqa ama bokiska warqadaaada diidmada ee lasaxiixay kadibna hoos ka eeg sanduuq walba waxa loola jeedo!

Warqadeyda waxaa ku qoran "Walaac gaar ah oo bani-aadannimo" "Special Humanitarian Concern"

Tani waa qayb aad u adag islamarkaana aad u yer. Hadii aad aragto in sanduugan lasaxiixey warqadda lagugu ogeysiiyey inaadan uqalmin dib u dejin (NOI) Fadlan email kusoo dir cinwaankan info@refugeerights.org

Warqadeyda waxaa ku qoran "Sheegasho qaxootinimo" "Refugee Claim"

Sarkaalka wuxuu go'aan ku gaarey inaadan buuxin shuruudihii qaxootinimada laga rabey. Waxaa jira laba sanduuq oo kale: a) "Caddibaad/saxriirin(persecution)" iyo b) "Sifo dhowris" (protected characteristic) waxaa laga yaabaa in mid ama labada sanduuqba lasaxiixo si loo sharxo sababta uu sarkaalka uu ugu maleeyey inaadan buuxin shuruudihii laga rabey qaxootinimada.

Haddii sanduuqa ugu horeeya ee ay kuqoran tahay "*Persecution*" lasaxiixo ama calaamad lasaaro sarkaalka wuxuu umaleeyey inaad cadeyn waysey in caddibaad ama dhibaato laguu geystey waqtiyadii lasoo dhaafey ama aad cadeyn waysey in ay jirto sabab macquul ah oo keeni karta in mustaqbalka aad lakulanto cadibaad ama dhibaato (persecution).
caddibaadu waa iney noqotaa nooc kamid ah dhibaato xalis ah ha ahaato mid muuqata sida xadgudub ama halis dil ah, ama mid aan muuqan sida in laguu ogolaan diintaada inaad kudhaqanto. cabsidaada waxaa lagu muujin karaa wax gaar ah oo sababo macquul ah kudhisan oo adiga kugu dhacay ama waxyaabo kudhacay dad adiga kula mid ah oo kusugnaa xaalad taada lamid ah islamarkaana joogey wadankaaga.

Haddii sanduuqa labaad ee ay kuqoran tahay "*Protected Characteristic*" lasaxiixo ama calaamad lasaaro, sarkaalka wuxuu umaleeyey inaad cadeyn waysey in laguu dhibaateeyey ama laguu dhibaateyn karo qoladaada, diintaada, jinsiyaddaada darteed ama xubbin ka ahaanshahaaga koox gaar ah oo bulshada katirsan ama fikir siyaasadeed oo aad aaminsan tahay darteed.

Mareykanka marka laga hadlaayo, qofka wuxuu buuxin karaa shuruudaha qaxootinnimo keliya marka qofka horey caddibaad/dhibaato loogusoo geystey ama uu mustaqbalka kabaqaayo in dhibaato loo geysto sababo laxiriira qoladiisa, diintiisa, jinsiyaddiisa ama xubin ka ahaansho koox gaar ah oo bulshada katirsan ama fikir siyaasadeed oo uu aaminsan yahay darteed. Inta badan dadkan waxaa larabaa iney yihiin dad markaasba jooga meelo kabaxsan wadankooda hooyo.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyin kamid ah nooca dadka buuxin kara sharuudaha sharciga ah ee qaxootinimada:

- Ahmad waa nin sunni ah oo ka yimid megaalada Bagdaad ee wadanka Iraq. Wuxuu bilaabey inay kasoo gaaraan hanjabbaado haga maleeshiyaad shiica ah lagasoo bilaabo horaantii sannadii 2004 iyadoo ay kororteey khilaafaadka sokeeye ee kudhisan kooxeysiga kadib duulaankii uu mareykanka kugaley wadankaas. Dukaan yer oo uu lahaa ayaa lagubey bishii juun 2005 tii islamarkaana waxaa la afduubtey walaalkiis bishii Ogoosto 2005 ta. Bishii sebteember, waxaa taleefon usoo direy qof sheeganaayo inuu kamid yahay maleesiyaadka shiicada wuxuuna ku eedeeyey murtadnimo iyo inuu lashaqeeyo ciidanka mareykanka. Ahmed wuxuu u rarey xaaskiisa iyo labadiisa caruur megaalada Basra si ay ula noolaadaan xididkiisa (gabadha uu qabo reerkooda). Bishii janaayo sanadkii 2006 da wuxuu ogaadey in walaalkiisi la afduubey qoorta laga jarey, isagana wuxuu usoo cararey wadanka Jordan.
- Haitham waa nin masaari ah oo ka dhashey qoys muslim ah laakiin qaatey diinta kirishtaanka markii ay da'diisu ahayd 22 jir. Abaar marka lajoogaba marbuu aadi jirey kaniisad kutaala megaalada Qaaxira laakiin markii dambe wuu joojiyey kadib markuu ogaadey in deriskiisa ay bilaabeen inay kashakiyaan. Wuxuu si gaar ah usii watey inuu diintiisa ku dhaqmo isagoo si kore isaga dhigaaya inuu yahay muslim. Wuxuu xiriir jaceyl labilaabey naag kirishtaan ah oo ladhaho Maria, laakiin isma guursan Karin culeyska dhanka diinta kahaystey awgeed. Maalin maalamaha kamid ah nin baa u yimid oo kudhaxay haddii aadan wax iska bedelin oo aadan wadada toosan soo marin waa lagu dili doonaa. kadib Haitham iyo Maria waxay u carareen wadanka Turkiga.
- Sumaya waa naag Suuriyaan ah oo katimid megaalada Dirca ee koonfurta wadanka Suuriya. Bishii Abriil 2015 meeshii ay deganeyd ayaa la duqeeyey dhowr kamid ah xubnaha qoyskeeda ay aad isugu dhowaayeen ayaa ladiley oo uu kamid yahay ninkeeda iyo labo wiil oo ay dhashey. Sumaya iyo gabadheeda lix sano jirka ah ee weerarkaas kabadbaadey waxay go'aansadeen iney u cararaan wadanka Lubnaan si ay ugu biiraan walaalkeed oo kunoolaa xero meesha kutaaley. Intii ay wadada kusii jireen waxay ku dhaxdhaceen niman hubeysan kuwaasoo kufsi iyo garaacis isugu darey kadib markii ay ku eedeeyeen iney kamid yihiin dadka dowlada taageera. Kadib waxay ku qasbeen iney kulaabtaan megaalada Dirca laakiin Sumaya waxaa u suuragashey iney usoo gudubto oo ay soo gasho wadanka Jordan.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyin kamid ah nooca dadka laga yaabo iney buuxin waayaan sharuudaha sharciga ah ee 'qaxootinimada':

- Ahmad waa nin Shiica ah oo ka yimid megaalada Baqdaad ee wadanka Iraaq. Wuxuu shaqo u aadey wadanka Turkiga sanadkii 1998 dii kadibna wuxuu go'aansadey inuusan kulaaban Iraaq kadib duulaankii uu mareykanku kugaley wadankaas. Ahmed kama baqaayo inuu ku laabto Iraaq, si kastoy ahaataba dhowaan buu waayey warqadii ogolaanshaha shaqada ee uu Turkiga uga shaqeysan jirey marka wuxuu rabaa inuu aado Yurub halkaasoo uu shaqo kaheli karo.
- Murad waa nin udhashey wadanka Suudaan oo Jordan ugu safrey fiiso caafimaad. Wax saameyn ah kuma yeelan isku dhacyadii kadhacay gobolka Daafuur ee wadanka Suudaan. Marabo inuu ku laabto Suudaan sababtoo ah dhaqaalaha wadanka suudaan ayaa xun. Wuxuu jeclaan lahaa inuu daaweyntiisa kusii wato mareykanka.

Warqadeyda waxaa ku qoran "Dhibaateyn dadka kale" "Persecution of Others"

Sarkaalka wuxuu go'aan ku gaarey in laga yaabo inaad dhibaateysey ama aad kaqaybqaadatey dhibaateynta dad kale. Tusaale ahaan, Haddii aad waardiye kanoqotey xabsi dad lagu jirdiley ama aad maxaabiis xabsiga u kaxaysey, waxaa laga yaabaa inaad kaqayb qaadatey dhibaateynta dad kale. Is weydii su'aalahan soo socda:

- Matiri militerigaan ka mid ahaa ama kujirey?
- Sidee u sharaxdey hawshii aad militeriga kasoo qabatey?
- Masheegtey wax ururo aad ku lug lahayd?
- Hawlo noocee ah baad usheegtey inaad lasoo qabatey ururadaas?

Warqadeyda waxaa ku qoran "Dib udejin Sugan" "Firm Resettlement"

Sarkaalka wuxuu go'aan ku gaarey in deganaansho sugan lagaa siiyey wadan kale oo aan ahayn wadankaaga hooyo. Is weydii su'aalahan soo socda:

- Haggee kusoo noolaatey kadib markii aad kasoo carartey wadankaaga hooyo?
- Maka heshey wax deganaansho joogta ah mid kamid ah wadamadaas aad kusoo noolaatey??
- Haddii aad ka heshey, Sidee usharaxdey noloshaadi intaad ku nooleyd wadamadaas?

Warqadeyda waxaa ku qoran "Suurtagalnimada oggolaansho "Admissibility"

***Qaybta 1aad*:** Qaybtan waa sadar gacan kuqoran oo laga yaabo inuu kahadlo mid kamid ah tusaalooyinkan soo socda:

- INA § 212 (a)(6)(C) - Macluumaad Been-abuur ah. Tan macnaheedu wuxuu yahay in si ogaal ah loo qariyo ama looga been sheego Xaqiiq/Arin muhiim ah.
- INA § 212 (a)(2)(A)(i)(I) - Dembi ku saabsan anshax xumo ku kicid. Tan macnaheedu wuxuu yahay in horey qofka dembi loogu xukumey ama gelid dembiyada qaar ama dhaqamada qaar.
- INA § 212 (a)(3)(B) - Gudbin macluumaad taageero argagixiso. Tan macnaheedu wuxuu yahay inaad kaqayb qaadatey ama aad taageertey hawl argagixisanimo, mararka qaar hataa si aan toos ahayn ama qaab yer, sida inaad siiso cunto ama aad canshuur siiso xubin

kamid ah urur argagixiso. Koox kasta oo isticmaasha qaab aan sharci ahayn waa suuragal in loo tix geliyo urur argagixiso.

Haddii laguusoo diidey si gaar ah qodobkan daraadiis INA § 212 (a)(3)(B) , is weydii su'aalahan soo socda :

- Maka hadashey wax kusaabsan lacag aad siisey shakhsiyaad ama ururo?
- Maka hadashey wax ku saabsan inaad siisey cunto, hooy, caawimaad ama wax faa'ido leh shakhsiyaad ama dad katirsan urur?
- Maka hadashey wax kusaabsan taageero aad siiso ururo?
- Maka hadashey wax kusaabsan inaad dad kale ku qancisyey iney ku biiraan urur?
- Maka hadashey qayb ka ahaansho ama waqti laqaadasho urur gaar ah hataa hadii aaney khiyaarkaaga/rabitaankaaga ahayn waqtiga aad laqaadatey ururadaas?

Qaybta 2aad: Qaybtan waxay kahadleysaa hadii aad dalban karto cafis. Haddii aadan heli Karin caawin sharciyeed, Xaruunta taageerta dib u dejinta ee kutaala meesha aad joogto (sida. IOM ama ICMC) ayaa kugu caawin karta inaad buuxiso dalabkaaga cafiska. Xaq uma lihid inaad si iskaa ah u hesho cafis, sidaa daraadeed waa inaad muujisaa in cafintu ay ku haboon tahay keliya markey jiraan sababo bani-aadannimo, sabab laxiriirta in midnimada/wadajirka qoyska ay muhiim tahay, ama sabab laxiriirta danta guud.Haddii aad dalbato cafis adoo u maraaya xaruuntaada taageerta dib u dejinta waa inaad xustaa islamarkaana aad keentaa wixii cadeymo ah ee kusaabsan dhibaatooyinka gaarka ah ee aad kula kulmeyso wadanka aad ku nooshahay,sidoo kale waa inaad sheegtaa xiriirka kaala dhaxeeya qoys mareykanka jooga ama laqorsheeyey in mareykanka ladejiyo iyo wixii kaloo kaala dhaxeeya mareynkanka sida u shaqeyn dowladda mareykanka aad u shaqeysey. Noocyada qaar oo oggolaansho la'aanta ah wax cafis ah malahan. Habka keliya ee looga gudbi karo waa inuu qofka qoro dalab dib u eegis lagu guuleysto "successful RFR" Haddii lagugusoo diidey looma oggolaan karo "inadmissibility iyo sabab kale" laguuma ogolaan doono inaad ka dalbato diidmadaas (inadmissibility) ilaa uu dalabkaaga dib u eegista diidmo uu kanoqdo mid guuleysta.

Warqadeyda waxaa ku qoran "Aamminaad "Credibility"

Sarkaalku ma rumeysna qaar kamid ah sheegashooyinkaaga. warqaddu waxay kaloo tilmaameysaa in sarkaalku kaala Hadley walaaca uu ka qabo arintaas inta uu socdey wareysiga islamarkaana aadan bixin sharaxaad macquul ah. Waa iney jiraan labo liis oo dheeri ah iyadoo sanduuqyo/boxes dheeri ah la saxiixay ama calaamad lasaarey.

Liiska 1aad: Sanaadiiqdan/boxes waxay muujinayaan mowduuca laguugu heley inuusan caqli gal ahayn. Arimahan waa isla shanti arimood een aan kor ugasoo hadalney (walaac bani-aadannimo gaar ah: special humanitarian concern, sheegasho qaxootinnimo: refugee claim, Dhibaateyn dad kale: persecution of others, Dib udejin sugan: firm resettlement, Suurtalnimo oggolaansho: admissibility) iyo "kuwo kale."

Liiska 2aad: Sanaadiiqdan/boxes waxay muujinayaan sababta uu sarkaalku ugu maleeyey inaad run sheegeynin. Waxaa jira shan sababood oo suuragal ah:

- Waxaad sheegtey hadalo isbed-bedelaya intii uu socdey wareysiga.
- Hadaladii aad sheegtey inta uu socdey wareysiga waxay ahaayeen kuwo ka bedelan xaqaa-iqda kale ee jira (tusaale. qoddob war ah, warbixin guud, iwm.).
- Jawaabaha aad kabixisey su'aalaha ugu muhiimsanaa ma ahayn kuwo si dhameystiran loo faafaahiyey.
- Markhaatiyada aad bixisey ma ahayn kuwo caqli gal u ah sarkaalka ama uu ku qanci karo marka loo eego macluumaadka guud ee ay ka ogyihiin xaalada kajirta wadankaaga.
- Waxyaabo kale.

Isweydii su'aalahan soo socda:

- Dib u xasuuso wareysigii ay kula yeelatey USCIS. Majirey mawduuc aad uga hadashey si kaduwan sidii aad uga hadashey wareysiyadii aad horey usoo martey?
- Qofka kuwareysanaayey makugu celiyey qayb kamid ah wixii aad soo martey inaad dib uga sheekeyso?
- Matahay qof dhib/musiibo kasoo badbaadey? Makugu adag tahay inaad dib u xasuusatid waxyaabo gaar ah oo aad soo martey, ama inaad uxasuusatid sidey isugu xigeen? Dawooyin dhimirka/maskaxda laxiriira miyaad qaadataa? Arintan ma u sheegtey sarkaalka ku wareystey?

Warqadeyda waxaa ku qoran "Sababo kale" "Other Reasons"

Waxaa laguu diidey Arin amni laxariirta. Arintaas waxaa laga yaabaa inaan looga hadlin wareysigaaga oo keliya la ogaadey intii lagu guda jirey baaritaanada amniga ee ay dowladda mareykanku sameyso. Diidmada noocan ah aad bay uyer tahay in wax laga bedelo, dalabkaaga dib u eegista diidmada waa inaad kusoo gudbisaa wixii kugu caawin kara inaad soo bandhigto inaadan xalis ku ahayn amaanka mareykanka.

TALAABADA SEDAXAAD: Sameyso Kiiskaaga

Warqadaada dalabka dib u eegista waa iney kahor timaadaa diidmada lagusoo diidey sida (1) inaad si faahfaahsan usharaxdo in sarkaalka kuwareystey uu sameeyey qallad ahmiyad wayn leh oo keeney in lagu diido iyo/ama (2) inaad keento caddaymo cusub oo bedeli karta go'aankii lagugu diidey. Haddii dalabkaaga dib u eegista RFR uu intaas sameyn waayo waxay ubadan tahay in lasoo diido.

Maxay yihiin nooca qaladaadka ahmiyadda wayn leh ee dib u furi kara kiiskeyga dalabka qaxootinnimo ee mareynkanka?

Waa inaad muujisa in sarkaalka kasocdey USCIS uu sameeyey qallad aad umaleyneyso inuu sababey diidmada lagu diidey. Si aad go'aan uga gaarto iney taasi dhacdey, is weydii:

1. Sarkaalku makuu ogolaadey inaad sharaxdo qaybaha ugu muhiimsan ee wixii aad soo martey?
2. Majireen qaybo kamid ah wixii aad soo martey oo uu sarkaalku waxba kaa weydiin?
3. Sarkaalku makuu ogolaadey inaad sharaxdo caddaymihii aad keentey?
4. Haddii aad awoodi weydey inaad keento cadeymo sarkaalku maku weydiiyey inaad sharaxdo sababta aad u keeni weydey caddaymahaas?
5. Haddii uu sarkaalku rumeysnaa in sheekadaada ay kujireen hadalo isbed-bedalaayo maku weydiiyey inaad sharaxdo sababta isbed-bedelkaas?

Halkan waxaa ku qoran qaar kamid ah qaladaadka ugu ahmiyadda badan leh ee ugu caansan. Liiskan ma ahan mid dhameystiran. Noqo mid hal abuur leh, laakiin mar walba runta sheeg:

- Sarkaalku kuma weydiin xaqiiqooyin muhiim ah oo kusaabsanaa sheegashadaada qaxootinnimo.

  Tusaale: wareysigeeda qaxootinimo, Samira waxay ku sheegtey in laxirey laakiin ma sharxin in si qallad ah loo xirey. sarkaalku waxba kama weydiin xiritaanka kadibna waxaa loosoo diidey dalabkeeda qaxootinnimo xiritaanka dartiis.
- Waad awoodi weysey inaad keento caddaymo inta lagu jirey wareysigaaga sarkaalkuna kuma weydiin sababta aad u keeni weydey caddaymahaas.

  Tusaale: Wareysigiisa qaxootinnimo, Malik wuxuu ku sheegey in qoyskiisa ay ku qasbeen inu guriga katago sabab laxiriirta diinta uu aaminsanaa darteed. Malik makeenin wax caddaymo ah oo muujinaya in lagu qabsey inuu guriga katago intii lagu jirey wareysigiisa qaxootinnimo sababtoo ah caddaynta waxaa haayey saaxiibkiis oo kusugan wadankiisa hooyo. Qofka wareysanaayey masiinin Malik fursad uu ku sharxo sababta uu u keeni waayey caddaynta.
- Sarkaalku kuuma ogolaan inaad sharaxdo sababta isbed-bedelka sheekadaada ama wixii aad soo martey.

Caddayn cusub oo noocee ah ayaa dib ufuri karta kiiskeyga dalabka dib u edejin ee mareykanka?

Waa inaad keentaa macluumaad cusub oo taageeri karta sheegashooyinkii aad sameysey wareysigaaga koowaad. Macluumaadkan cusub waxay noqon karaan caddaymo aad haysey wareysigii hore laakiin aadan keenin iyo/ama caddayn aad soo ururisey wareysigaaga qaxootinnimo kadib. Caddaynta cusub waa iney laxiriirtaa sababta diidmadaada. Tusaale ahaan, haddii laguu diidey dembi khatar ah oo aad horey u gashey darteed caddayn cusub oo muujineysa inaad kabaqeyso cadibaad/ dhibaato ma xalin doonto sababta diidmadaada.

TALAABADA AFARAAD: Soo diyaarso wixii dokumentis ah ee kiiskaaga xoojin kara

IRAP
International Refugee
Assistance Project

Seen ku ogaadaa dokumentiska aan ku lifaaqaayo dalabkeyga?

Si aad go'aan uga gaarto caddaymaha wax tari kara dalabkaaga dib u eegista RFR, Isweydii su'aalahan soo socda:

- Mahaysaa wax dokumentis ah oo aadan gudbin intii lagu guda jirey wareysigaagi asalka ah/hore?
- Majiraa dokumentiyo laxiriira sheegashadaada qaxootinnimo oo uu kuusoo diri karo qof katirsan qoyskaaga, saaxiib ama deris jooga wadankaagi hooyo (tusaale, waraaqo, waraaqo shakhsiyadeed, kaarar aqoonsi iwm)?
- Majiraan wax dokumentis ah oo laxiriira sheegashadaada qaxootinnimo oo aad kadalban karto urur (tusaale, warbixino caafimaad inaad kahesho isbitaal ama dhakhtarkaaga, warbixin booliis oo lagaagasoo diro saldhiga booliska deegaankaaga, koobi shahaadaada oo uu kuusoo diro iskuulkaaga)?
- Majiraan wax sheekooyin ah oo ay qoreen wargeysyo, joornaalo ama internetka oo caawin unoqon kara sheegashadaada qaxootinnimo oo uu ama kuusoo diri karo qof saaxiibkaa oo wadankaaga jooga ama aad online ahaan ku heli kartid (tusaale sheeko kusaabsan khatarka gobolkaaga kajirta oo uu qorey wargeys, sawiro internetka kujira oo kusaabsan weeraro kadhacay megaaladaada)?
- Haddii aad lumisey ama baabi'isey wax dokumentis muhiim ah (tusaale, Kaarkaagi aqoonsiga militeriga ama warqad hanjabaad), mataqaanaa qof arkey dokumentiga oo qori kara warqad qeexaysa wixii uu arkey?
- Hadii aadan haynin wax keyd ah oo kusaabsan wax kugu dhacay oo muhiim u ah sheegashadaada qaxootinnimo (tusaale, waa lagu garaacay, waa lagu handadey ama dhuumasho ayaad kujirtey), mataqaanaa qof arkey waxa kugu dhacay oo qori kara warqad qeexaysa waxa uu arkey?
- Haddii aad aaminsan tahay in sababta laguu diidey ay tahay inaad caddayn weysey in xiriirkaaga qoysnimo inuu sax yahay islamarkaana aad rabto inaad lagudbiso caddayn hido side DNA dalabkaaga dib u eegista RFR, waa inaad laxiriirtaa xaruunta caawisa dib u dejinta ee ku taala meesha aad joogto si aad ugala hadasho waxyaabaha lagaa rabo si aad u hubsato in caddayntaada la aqbalo.

Dokumentis noocee ah ayaan ku lifaaqi karaa?

Halkan waxaa ku qoran qaar kamid ah noocyada ugu caansan ee caddaymaha ay tahay inaad ku lifaaqdo dalabkaaga dib u eegista go'aanka diidmada RFR. Liiskan madhameystirna ee noqo mid hal abuur leh laakiin mar walbo runta sheeg.

- Shaac ka qaadis caddayn, Declarations: Shaac kaqaadistu waa hadal qoraal ah oo kakooban xaqiiqooyin qof uu caddaynaayo iney run yihiin. Saaxiib ama xubin qoys ayaa qori kara islamarkaana saxiixi kara caddaynta si loogu kaabo dalabkaaga dib u eegista diidmada RFR. Caddayntooda waa iney qeexdaa waxa ay ogyihiin ama ay arkeen. Adiga hataa waxaad qori kartaa caddayn aad ku faafaahineysid sababta dalabkaaga loogusoo diidey si qalad ah waxaadna lagudbin kartaa caddayntaas warqadda dalabkaaga dib u eegista RFR.caddayntaadu waa iney sidoo kale faafaahisaa wixii qalad ahmiyad leh ee

dhacay, ku lifaaq caddaymo cusub ama samee labaduba. Waa inaad saxiixdaa caddayntaada kuna lifaaqdaa wixii kaloo faafaahin dheeri ah ee suuragalka ah.

- Dokumentis Rasmi ah, Official Documents: waxaad keeni kartaa shahaadooyinka dhalashada, warbixin caafimaad, warqadda shaqadaada militeriga, warqad kasocota cida aad ushaqeyn jirtey haddii aad horey ugusoo shaqeysey urur aan dowli ahayn oo caalami ah NGO ama Shirkad, ama taqriir booliis. **Weligaa haku darrin dokumentis been abuur ah dalabkaaga dib u eegista diidmada RFR.**
- Caddaymaha kale ee wax tari kara, Other Supporting Evidence: Marka lagu daro dokumentiska rasmiga ah caddaymaha kalena way xoojin karaan dalabkaaga dib u eegista . ufikir qaab hal abuur leh. tusaale ahaan, sawirada, blogska ama waxyaabaha lasoo dhigo baraha bulshadu kuwada xiriirto, fariin qoraaleedka, e-mailada, warqadaha hanjabaada ah, ama sheekooyinka wargeysyadu ay kaqoraan wadankaaga ama wadanka aad qaxootinimada kujoogto dhamaan waxaas way ku caawin karaan.

Maxaan ka dhahaa dokumentiskan?

Caddayn kasta oo aadan keenin wareysigaagi asalka ahaa waa inaad faafaahisaa sababta aad u keeni weydey.tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad haysey cadayn intii lagu jirey wareysigaaga laakiin aadan fahmin in sarkaalku uu ku weydiiyey caddayntaas sidaas darteedna aadan tusin.

Ma heli karo wax dokumentis ah.

Haddii aadan heli Karin caddaymo muhiim ah oo aad ogtahay iney jiraan waa inaad faafaahisaa sababta aadan u heli Karin caddaymahaas. Tusaale ahaan, hadii aad tuurtey warqad hanjabaad oo gurigaaga looga tagey. Faafaahin kabixi sababta warqadaas aad u hayn waydey oo aad u tuurtey marka aad qoreyso dalabka dib u eegista diidmada RFR. Isticmaal aad isticaasho dokumentis been abuur ah ama wax kajirin waxay keeni kartaa in si degdeg ah oo aan kanoqosho lahayn loosoo diido dalabkaaga dib u eegista RFR. Hataa haddii aad umaleyneyso in dokumenti uu muhiim u yahay dalabkaaga dib u eegista RFR laakiin aadan heli Karin, **Ha isku dayin inaad hesho koobi been abuur ah.** Taas bedelkeeda ka fikir qaabab kale oo aad kusoo bandhigi karto macluumaadka aad rabto inaad soo bandhigto. Tusaale ahaan, ka keen warqad saxiixan xubin qoyskaaga katirsan ama deriskaaga kuwaasoo soo gudbin kara macluumaadka aad ubaahan tahay.

TALAABADA SHANNAAD: Qor dalabkaaga dib u eegista diidmada qaxootinimo ee loo yaqaano marka lasoo gaabiyo “RFR”

Qaybta 1aad: Hordhac (Introduction) (3-5 jumladood)

Qor seddax ama shan jumladood oo aad ku sharxayso sababta ay tahay in dalabkaaga dib u eegista loo aqbalo.qaybtan waa inaad uga hadashaa sida qalad wayn oo dhacay uu usababey diidmadaada **iyo/ama** sababta ay u tahay in caddaynta cusub darteed ay tahay in dib u dejn lagusiiyo.Haddii aad gudbineyso dalabkaaga dib u eegista diidmada kadib 90 maalmood markey

kasoo wareegatey kusoo gaaritaankii warqadda diidmada, waa inaad sharaxdaa sababta u haysato inaad gudbiso dalabkaaga waqti dambe (tusaale ahaan, ma helin warqadda diidmada, ma qortid ama kuma hadashid English, dhibaato caafimaad oo daran baa ku haysey, IWM.).

Qaybta 2aad: sheekadaada/wixii kusoo marey (Your Story) (1-5 bog) (pages)
Sheeg sheekadaada. tani waa iney kujirtaa faafaahin dhameystiran sababta aad u raadineyso in dib u dejin lagu siiyo sidoo kale sharaxaad kabixi wixii dhacay intii lagu guda jirey wareysigaaga dib u dejinta, wixii kusoo marey u sheeg qaabka ay isugu xigxigeen. Been ha sheegin ama ha buunbuunin sheekadaada. Runta oo aad sheegtaa waa muhiim. Wixii been aad sheegto ama buunbuunin aad sameyso waxay keeni kartaa in dalabkaaga dib u eegista lasoo diido iyo sidoo kale in mustaqbalka ladiido wixii dalabaad kale oo xijro ah ee aad latimaado.

Qaybta 3aad: Sheegashada qaxootinimo (Refugee Claim) (1-2 bog) (pages)
Sharax sababta aad ku buuxisey sharuudaha laga rabo "qaxootinnimada" waa inaad muujisaa "wixii dhibaato/ caddibaad horey kuusoo gaarey ama cabsi lataaban karo oo ah in mustaqbalka laguu dhibaateyn karo sababo laxiira qoladaada, diintaada, jinsiyadaada, fikir siyaasadeed, ama xubbin ka ahaansho koox gaaar ah oo bulshada katirsan".

Qaybta 4aad: sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan wixii qaladaad muhiim ahaa ee dhacay iyo/ama caddaymo cusub (Detailed Explanation of Significant Error and/or New Evidence) (1-5 bog) (pages)
Qaybtan waa iney noqotaa qaybta aad diirada ku saareyso dalabkaaga RFR. Ku lifaaq sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan sababta ay u tahay in dalabkaaga dib u eegista loo aqbalo sababo laxiira qaladka uu sameeyey sarkaalka darteed iyo/ama caddaynta cusub. waa inaad ku dartaa dhamaan wixii macluumaad cusub ah iyo/ama qaladaadka muujinaya inay tahay in warqadaada diidmada labedelo oo ogolaansho lagu siiyo.

TALAABADA LIXAAD: Gudbinta dalabkaaga 'RFR' ka

Si aad u ogaato meesha aad ka gudbineyso dalabkaaga, fadlan eeg oo talo weydiiso websiteyadan hoose.

- Request for Review Filing Locations - Europe, Middle East and Africa (EMEA) District
- Request for Review Filing Locations - Asia Pacific (APAC) District
- Request for Review Filing Locations - Latin America, Canada and the Caribbean (LACC) District

Haddii wadanka aad wareysiga ku gashey uusan lahayn qaab loo maro xareynta dalabka oo websiteyadan kujirin, fadlan laxiriir xaruunta caawisa dib u edejinta qaxootiga ee kutaala meesha aad joogto (sida, IOM, ICMC, IRC, HIAS, ama CWS).

Waxaan mar walba si hoog leh ugu talineynaa inaad ka xaqiiqsato xaruuntaada fududeynta dib udejinta RSC sida saxda ah ee loo gudbiyo dalabkaaga dib u eegista RFR iyadoo aan la eegeynin goobta xareynta dalabkaaga.

Halkan waxaa ku qoran waxyaabo ay muhiim tahay in laxasuusto:

- Hubso in RFR kaaga lagu daabaco English. adeegso turjumaan la aamini karo.
- Waa inaad ku saxiixdaa pageka ugu dambeeya ee RFR kaaga qallin biire madow.
- Gadaal uga dheji caddaymaha, sawirada qoraalada dokumentiska rasmiga ah, iyo wixii caddaymo wax tari kara. xubso sidoo kale inaad raaciso turjumaada englishka ah.

Maxaa Xigi doona?

Jawaabaha dalabaadka dib u eegista diidmada qaxootinnimo RFRs waxay qaataan ugu yeraan sedax ilaa lix bilood in lahelo. Haddii seddax bilood kadib aadan helin wax jawaab ah oo ku saabsan dalabkaaga RFR waa inaad kala socotaa xaruunta taageerta dib udejinta qaxootiga ee kutaala meesha aad joogto. Waxaad dabagal kusameyn kartaa bil walba si aad u eegto xaalada dalabkaaga RFR ka iyo waxa kusoo kordhey.

Waa inaad heshaa go'aan qoraal ah oo ku saabsan dalabkaaga kaasoo laguusoo marin doono xaruunta taageerta dib udejinta qaxootiga ama waxaa toos kuugusoo diri doonta USCIS. Haddii cinwaankaaga/address wax iska bedelaan kadib marka aad gudbiso RFR ka waa inaad ogeysiisaa xaruunta taageerta dib udejinta qaxootiga.waxaa laga yaabaa in laguu aqbalo qaxootinnimo islamarkaana lagaa dalbado inaad marto wareysi kale, ama dalabkaaga uu sii ahaado sidii loo diidey.

Kiisaska qaar. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo inaad soo gudbiso caddaymo dheeri ah kahor intaan lagaa qaadan go'aan kama dambeys ah. Haddii aad ubaahan tahay inaad gudbiso caddaymo dheeri ah waxaa kusoo gaari doonta warqad lagaaga dalbanaayo inaad soo gudbiso caddaymo dheeri ah.

Haddii dalabkaaga RFR ladiido, kiiskaaga waxaa loo tixgelin doonaa mid xirmey USCIS ma qaadi doonto talaabo dheeri ah iyadoo aan la ogoleyn dalab labaad oo RFR in lasoo gudbiyo. Xaalado aad u yer ayuu shakhsi ku xareyn karaa RFR kale kuna codsan karaa in USCIS ay dib u eegto. Khiyaarkan uma badna in lagu guuleysto ilaa qofka uu haayo caddaymo cusub oo muhiim ah ma ahee.